



# ARAGTIDA DHAKHTARKA EE TELEFOONKA IYO FIIDIYOWGA

Udiyaargarawga balanta Khadka shabakada internetka

## Soo dajiso Barnaamijka (app) Zoom


Isticmaal Taleefoonada tayada leh (smart phones) ama I Pad (I padka ayaa igu fiican).

1. Gal dukaanka barnaamijyada laga gato ee Googleka ama dukaanka barnaamijyada laga gato ee qalabka aad haysato.
2. Ka dhex raadso barnaamijka Zoomka.
3. Soo dajiso/ rakibo barnaamijka Zoomka.




## Fiiri emailkaaga ama sanduuqa fariimaha (Text)

4. Email ama fariin qoraala ayaa lagu soo diri doonaa 15 daqiiqo gudahood intaanu baadhitaanka dhakhtarku kuu bilaaban. Riix/taabo websidka ku dhexjira fariinta telefoonkaaga.



## Qoraalka soo booda taabo/riix



5. Qaraalka soo baxa ayaa kugu hogaaminaya inaad furto barta kulanka ee barnaamijka zoomka.



# ARAGTIDA DHAKHTARKA EE TELEFOONKA IYO FIIDIYOWGA



## Sug kulanka dhakhtarka/kalkaalisada

6. Shaashad ayaa soo bixi doonta odhanaysa waxaad sugaysaa maamulaha qolkan inuu bilaabo kulanka (Ha taaban Sign in).





## Dhakhtarka waxa uu bilaabi doonaa kulanka

7. Marka uu dhakhtarku bilaabo kulanka, waxaa soo bixi doona fariin aad ku bilawdo fiidiyawga.



## Dooro Cod baahiyaha

8. Dooro Meesha codka laga maqlo si aad u isticmaasho cod baahiyaha qalabka casriga ah ee aad isticmaalayso.



## Bilaw fiidiyawga

Iyakulanka dhakhtarka si fiidiyaw ah.

